

15th Ave W/NW iyo Mashruuca cusboonaysiinta laamiga ee Buundada Ballard

Dulmarka Mashruuca

15th Ave W/NW waa Wado halbowle ah oo u adeegta waqooyi-galbeed Seattle. Iyada oo qayb ka ah cusboonaysiinta laamiyada ee Levy to move Seattle, Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) waxa ay laami marinaysa 15th Ave W/NW iyo Marsada Ballard Bridge laga bilaabo W Emerson St ilaa NW 57th St sida ugu dhakhsaha badan xagaaga 2023. Mashruucu waxa uu dib u soo celin doonaa xaalada qayb muhiim ah oo ka mid ah shabakada gaadiidka ee Seattle waxana uu gacan ka gaysan doonaa balan qaadka SDOT Levy si laami loo mariyo ilaa 180 haad-mayl oo wadooyinka halbowlaha ah ilaa 2024.

Horumarinta waxaa ka mid noqon doona:

- Meelaha laamiga la marinayo ee 15th Ave W/NW laga bilaabo W Emerson ilaa NW 57th St
- Hagaajinta qaybta lugta, gelitaanka guryaha, iyo biyo-mareennada biyaha roobka ee meelaha la doortay ee leh aagga laamiyada mashruuca
- Cusboonaysiinta Calaamadaha isgoysyada lugaynta iyo calamadaha rinjiga cusub ee meelaha hadda jira ee ku teedsan 15th Ave W/NW
- Cusboonaysiinta Rinjiga Cas ee jidka Baska kaliya ee ku yaal 15th Ave NW ee hada jira ee woqooyi u socda una dhexeeya NW 52nd St iyo Market St
- Bedelida isku-xirka ballaarinta buundada
- Hagaajinta badbaadada dhulgariirka iyadoo la xoojinayo buundada Leary Way (oo ku taal waqooyiga buundada Ballard)



Booqo websaydka mashruuca si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo si aad iskaga diiwaan geliso cusboonaysiinta iimaylka mashruuca.



MACLUUMAADKA MASHRUUCA & XIDHIIDHKA

Jules Posadas, Hogaaminta Wacyigelinta
15thAveW_NWpaving@seattle.gov ama (206) 651-3950
www.seattle.gov/transportation/15thAveBallardBridgePaving



Seattle
Department of
Transportation

The Levy to
MOVE SEATTLE



JADWALKA MASHRUUCA*

Abriil 2022: Naqshad hore

Gu'ga 2023: Naqshadeynta

Xagaaga 2023: Dhismaha

Dayrta 2024: Dhamaystirka

* Jadwalku mar walba waa is bedeli karaa iyadoo ay ugu wacan tahay helitaanka Qalabka iyo cimilada xun.

Warbixinta mashruuca

Sannad kasta, waxaan laami marina wadooyin halbowle ah oo xaaladdoodu liidato si aan uga dhigno kuwo ammaan ah, Sahlan, iyo si loo kordhiyo mudada isticmaalka wadadooyinkan waxtarka leh. Ku haysashada nidaamkayaga gaadiidka xaalad wanaagsan oo dayactir ah waxay naga caawinaysaa hoos u dhigista kharashka dayactirka mustaqbalka. Waxay ku salaysan tahay mudnaan siinta laamiyadu xaaladda laamiga waddada, mugga taraafigga, sinnaanta juqraafiyeed, qiimaha, iyo fursadaha deeqaha ama is-waafajinta mashaariicda kale ee aagga.

WAXAAN RABTAA IN AAN KAAGA MAQALNO

Fadlan buuxi ra'yi-ururintayada oo noo sheeg safarkaaga iyo baahiyahaaga safarka ee marinka mashruuca 15th Ave W/NW iyo Marinka Ballard Bridge. Sawir koodka QR ama booqo www.surveymonkey.com/r/6YQSRG9 si aad u samayso sahan kooban si ay nooga caawiso yaraynta saamaynta safarka Dadka iyo ganacsiyada inta lagu jiro dhismaha. Sahanku waa uu furnaan doonaa ilaa Janaayo 13, 2023.

